**AMARKA Lamb. 10.**

**Aasaasidda "Maamulka Adeegyada Dawladda Hoose".**

## MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOMALIYA

## MAAMULAHA

KADIB markii la arkay shariga lamb. 12 ee 8 Febarayo 1950;

KADIB makii laga baaran degey dekreetada Madaxweynaha Jambuuriyada Talyaaniga ee 31 Maarso 1950;

IYADOO la tixgeliyey aragtida in sare loo qaado ka qeyb gelida bulshada dhulka ku nool howlaha maamulida ee ku jaan go'aan mabaa'diida Heshiiska Maamulka Walaayada ee Somaliya, waxaa loo baahday in laga dhiso goobaha muhimka ah maamul adeegyada deegaanka;

IYADOO la tixgeliyey araagtida Golaha La Tashiga ee Qaraamada Madoobe;

IYADOO la tixgeliyey aaraaga Golaha Dulka.

## WUXUU AMRAYAA:

### Qod. 1

Laga bilaabo 1da Luulyo 1951 waxaa laga dhisayaa magaala madax kasta Guddomiye iyo Guddomiye ku- xigeenka maamul fulin doono adeegyada deegaanka.

Haddii loo baahdo waxaa kale oo la dhisi doona maamul la mid ah kuwa deegananada kale kadib markii ay muujiyaan in ay gaareen wax soo saar dhaqaale oo muhim ah.

### Qod. 2

Maamulida adeegyada deegaanada waxaa u xil saran Guddomiyaha ama Ku-Xigeenkiisa haddii aysan amarro kale oo ka duwan aysan jirin.

Guddomiyaha iyo Ku-Xigeenkisa waxaa taakuleyn doona Guddiga Deegaanka.

### Qod. 3

Guddiga Deegaanka waxay ka kooban tahay:

a) Shaqsiyaadka ugu qiimaha badan ee aaga deegaankaasi oo aan ka yareen 2 qofood kana badneyn 5 qofood;
b) Hal ama 2 qofood oo metelaayo dadka laga tira badan yahay oo madax banaan;
c) Hal ama 2 qofood oo ka socda qeybta dhaqaalaha;
d) Hal ama 2 qofood oo metelaayo meherooyinka, farshanka iyo xirfadleyda;
e) Hal wakiil oo ka socda ururada dhaqaanka iyo diinta.

### Qod. 4

Dekreetada ka soo baxda Maamulaha Walaayada ayaa carifidoona aaga maamulka adeega Deegaanka iyo tirada Guddiga Deegaanka.

**Qod. 5**

Xubnaha madax banan ee Guddiga Deegaanka waxaa laga laba jibaar ka dhigi karo kuraasta loo qondeeyey, Golaha Degmada, kuwaas oo laga soo dooran doono xubnahooda ama shaqsiyaad ka baxsan Guddiga.

Xubnaha aan madax banaaneyn ee ku cad xarafka b) ee qodobka 3, wuxuu Guddomiyaha ama Ku-Xigeenkiisa isagoo la tashaday bulshada danleeyda ah u qoondeeyn doonaan jagooyin laba jibaaar ah.

Xubnaha Guddiga waxaa laga soo xuli doono shaqsiyaadka ku nool xeendaabka aagaa degaankasi.

**Qod. 6**

Guddomiyaha Gobolka isagoo tixraacaya amaradda uu ka helay Maamulaha Guud wuxuu ku magacaabi doona amar sharci xubnaha Guddiga Deegaanka. Guddigaasi wuxuu hayn doona xilkaasi muddo 1 sano ah iyagoo wax mushar la siin doonin.

**Qod. 7**

Guddomiyaha ama Ku-xigeenka waxay tala weydisan karaan Guddiga Deegaanka arrimaha la xiriira xeendaabka aaga deegaanka.

Tala ay soo jeediso Guddiga Deeganku waa in la qaata xaddii ay khuseeyso arrimaha soo socda:

a) Misaanidada hordhaca ama iyo xisaabaadka kharajka;
b) Wax ka bedelidaa misaaniyadda hordhaca iyadoo weli isticmaalkiisa lagu dhex jiro;
c) Xeer nidaaminta la xiriirta adeegyaa iyo hey'adaha deegaanka;
d) Kharajyada ku xiran ilaa iyo 3 sano;
e) Kala bixinta ama ogolashaha hantida maguurtada ah ama kala bixinta hantida bulshada;
f) Dhismaha doonfuulka iyo xuquuqyada hantida;
g) Meeleynta iyo isticmaalka hantida maguurtada ah waqti ka badan 5 sano;
h) Maalgentia ka badan lacagta Sh.So. 5,000;
i) Ka qeyb galka heshiisyada amaahda;
l) Soo saarida canshuuraha iyo ganaaxyada;
m) Dacwooyinka taagan ama kuwaa la soo dhaafay oo qiimahoodu ka badan yahay Sh. So 5,000;
n) Hirgelinta mashaaric cusub amd dib-u-habeeyn qiimahoodu gaaraya Sh.So. 20,000 iyo Sh. So. 10,000 kiiba;
o) Shaashad qandaraas shaqeeyaa oo ka sarreeya Sh.So. 10000;
p) Heshiisyada tartanka dhismaha oo ka sareeya Sh.So. 5000;
q) Heshiisyada dhismaha howlaha guud;
r) Qorshoyinka dib-u-habeynta;

Taloo soo jeedintaasi waa mid aan qasab ahayn in la raaco.

**Qod. 8**

Kharajka ku baxaya adeegayada deegaanka waxay ka imaan doonaan canshuuraha ku carifan shuruucda loogu tala galay.

Iyadoo la dhowraayo xad uu gaari karo misaaniyadda, canshuurataasi waxaa kale oo ay dabooli doonta kharajyada ku bixi doono habeynta iyo fulinta mashaaricda loogu tala galay adeegyada bulshada sida suuqyada, goobaha lagu xareeyo xoolaha, ceelasha, ilaha biyaha iyo dib-u-habeynta adeegyada suqyada iyo qeybaha magaaleenta.

**Qod. 9**

Misaaniyada hor dhaca ah ee sanad dhaqale ee ka biloowda 1da Luulyo 1951 ilaa 30 Juun 1952 waa in Guddomiyaha Gobolka u xilsaaran horkeena Maamulka Dhexe si loo ansixiyo ugu dambeystii 31 Agoosto 1951.

Sanadyada ka dambeeyad, misaaniyada hordhaca ahi waa iyadoo la tixraaco hab sare ku xusan la horkeena bisha Febaraayo.

**Qod. 10**

Sidoo kale Guddomiyaha Gobolku waa in uu hor keena Maamulka Dhexe misaaniyadii la soo dhaafay, intii dhaqli ah ee soo gashay iyo intii kharaj ah, kuwaas oo la jaan qaadayo misaaniyadii hor dhaca ahayd ugu dambeystii 30 Setembar ee sanad walba.

**Qod. 11**

Hirgelinta go’aanadda ay gaareen Guddomiyaha iyo Ku-Xigeenka waxaa la dhowri doonaa amaradda la xirira ansixidda go’aanada Guddiga Gobolka oo ku carifan qodobada 11, 12, 13, 14, 15, 16, iyo 17 ee Amar sharci lamb. 9 ee 6 Juun 1951 oo la xirira dhismaha Guddiga Deegaan ee Maamulka Deegaanka ee Muqdishu.

**Qod. 12**

Cabashada lid ku ah go’aanada Guddomiyaha degmada iyo Ku-Xigeenkisa waxaa loo diri doona Guddiga Gobolka, cabaashooyinga lid ku ah amaradda iyo go’aanada Guddomiyaha Gobolka waxaa loo diri doona Maamulaha Guud, kaas oo go’aan kama dambeys ah ka gaari doono.

**Qod. 13**

Maamulaha Guud wuxuu, waqti kasto, kadib markuu loo soo dacwoodo, ama uu iskiis u bilaabo, ku dhawaaqi karaa wax kama jiraan amaraddi amd go’aanadii Guddomiyada Degmada ama Ku-Xigeenkiisa ay gaareen haddii ay cadaato in cilad dhinacaa aqoonta, ama ku xadgudub awood, sharci ama nidaamka guud ama gaarah amaba ay ka soo horjeestaan danta guud.

**Qod. 14**

Maamul deegaan kasto wuxuu yeelan doona Faafin lagu qori doono go’aananada ama xeerarka loo baahan yahay in bulshado ogaato.

**Qod . 15**

Amar- sharciyeedkaan ma khuseeyo magaalada Muqdisho, kaaso oo horay loogu dhisay Maamul Dowlad Hoose.

Muqdishu, 6 Juun 1951.

Maamulaha Guud
**Gorini**